Somaliska

Waa cadaalad in khidmad sax ah la bixiyo

Baaritaanka khidmadda

Waxay degmada Vimmerby sannad walba sameysaa baaritaan khidmadda si ay ugu hubiso in qoysaska booska ka haysta dugsiga barbaarinta, dugsiga xilliga firaaqada ama daryeelka waxbarashada ee degmadu ay khidmadda saxda ah bixinayaan. Waa cadaalad iyo arin xagga amniga in dhammaan qoysasku bixiyaan khidmad sax ah iyadoo loo eegayo heerka khidmad go'an ee jira.

Baaritaanka khidmadda ayaa la sameeyaa iyadoo laba sano dib loo noqonaayo maadaama oo aan xogta Hey'adda canshuurahu (Skatteverkets) la heli karin xilli hore. Dakhliga sannadlaha ah ee la cashuuro ee ku jira Hay'adda cashuuraha ayaa la barbar dhigayaa macluumaadka aad degmada siisay. Waxa dakhliga gundhiga u ah oo kharashka lagu xisaabinayaa dakhliga iyo gunnada aad cashuurta ku bixiso.

Waxay dadka intiisa badan bixiyaan khidmad saxda ah iyadoo aanay tanina saameyn ku yeelan doonin. Haddii baaritaanku uu muujiyo in lacag khaldan la bixiyay, ayaa saxitaan la samayn doonaa. Haddii aad wax badan bixisay, ayaa lacag celin la sameyn doonaa iyadoo haddii aad wax yar bixisay, aad heli doontaa qaansheeg uu ku yaalo faraqa u dhexeeya. Lacagaha 600 SEK ka yar ayaan dib loo soo celin doono ama qaansheegad la iskaga soo diri doonin.

Wax dheeraad ah ka akhri
www.vimmerby.se/utbildning-och-barnomsorg/forskola-och-barnomsorg/avgifter-och-regler/avgiftskontroll

Vimmerby kommun